


Qodobadda Warbixinta

- ✓ Hordhac
- ✓ Nidaam Aqoonsi Qaran
- ✓ Waxqabadkii Hay'adda
- ✓ Gunaanad



Hordhac


Xukuumadda Dan-Qaran ee uu hogaamiyo Raysal Wasaare Hamze Abdi Barre waxa ay xaqiijisay guulo waa wayn labadii sano ee u dambaysay. Mudadaas, dhammaan hay'adaha kala duwan ee dowladda oo ay qayb ka tahay Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaranka oo la howlgaliyay intii xukuumadda Dan-Qaran ay talada haysay, waxa ay sameeyeen kobac dhanka hormarka ah, waxaana la gaaray hormarro ay kamid yihiin meel marinta sharciga hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta oo 20 march 2023, uu saxiixay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Mudane Hassan Sheikh Mohamud. Iyada oo la xaqiijinaayo in muwaaddiniinta Soomaaliyeed ay noqdaan dad la aqoonsan karo oo leh tirsi number oo gaar ah.

Nidaam Aqoonsi Qaran

Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Qaran waxay bilowday inay diyaariso nidaam aqoonsi qaran (Somali National Identity System – SNIDS) kaas oo loogu talo galay in lagu maareeyo nidaam aqoonsi oo asaasi ah, oo suurtagalinaya in qof kasta oo muwaadin ama sifo sharci ah ku deggan dalka ama qaxooti ku ah JFS, iyadoo la siiyo tirsi aqoonsi u gaar ah, iyo kaar aqoonsi.

Si waafaqsan qodobka 8-aad ee sharciga aqoonsiga iyo diiwaangelinta dadweynaha, hay'addu waxay diyaarisay, qalabaysay, isla markaasna howlgalisay xarun xogdhigis oo ay iyadu maamusho, taas oo lagu kaydinayo xogta dadweynaha ee la uruuriyey, nidaamka aqoonsiga qaran (SNIDS) iyo nidaamyada danabaysan oo iyadu ay dhistay ama horumarisay.

Sidoo kale waxay Hay'adda furtay xarumo diiwaan galin kuwaas oo loo asteeyay in muwaadiniinta ku nool gobolka Banadir ka helaan xarumo diiwaan galin kuwaas ay ka heli karaan adeega aqoonsiga qaran. Waxaa la furay 4 xarumood (Yaqshid, Shangani, Wadajir, iyo Hawl-wadaag). NIRA.



✔ Waxqabadkii Hay'adda

1. Aas-aasid Hay'adda Aqoosiga (Sharciyadda)

A- Dib- u eegista iyo diyaarinta Sharciga Hay'adda lagu aas aasay (L.R 009)

B- Diyaarinta xeerarka/Qorshayaal lafdhabarka u ah shaqadda hay'adda oo ay kamid yihiin:

- ✔ **Xeer-Nidaamiyaha Jaangoynta Khidmadda Adeegyada Aqoonsiga Qaran Xeer-nidaamiyaha**
- ✔ **Hannaanka Fulinta Diiwaangelinta Aqoonsiga Qaran Xeer-nidaamiyaha Dhawrista Xogta**
- ✔ **Xeernimaayaha khidmad dhaafka**
- ✔ **Hab-Dhaqanka Howlwadeennada (Code of Conduct)**
- ✔ **Qorshaha Istiraatijiyadda Hay'adda ee 2023-2026**
- ✔ **Istiraatijiyadda Fulinta Diiwaangelinta Aqoonsiga Qaran (Operationalization Strategy) Istiraati-**
- ✔ **jyadda war-faafinta (Communication Strategy) ee Aqoonsiga Qaran**
- ✔ **Qorshaha ka qayb galka iyo howlgalinta daneeyeyaasha (Stakeholder engagement plan) Qor-**
- ✔ **shaha maaraynta Khataraha (Risk Management Plan)**
- ✔ **Habraacyada korjoogtaynta, qiimaynta iyo suggida tayada adeeg bixinta iyo**
- ✔ **Shuruucda iyo xeer-nidaamiyeyasha kale ee la xiriira waajibaadka hay'adda.**

2. Hawlgalinta Shaqaalaha

- A Shaqaaleysiinta xirfad layaal leh aqoon iyo khibrad la-xariirta shaqadda Hay'adda.
- B Aqoon isweydaarsi dibadda. (Pakistan, South Africa, Ethiopia, Kenya Iyo Malawi).
- C Dhaarinta dhammaan shaqalaha hay'ada ee u xilsaaran qabashada Maamulka iyo Ilaalinta xogta dadweynaha, waxaana qofkasta laga saxiixay heshiiska Ilaalinta Xogta.






3. Xarunta Dhexe ee Hay'adda

- A Kireynta iyo Qalabaynta Xarunta dhaxe ee Hay'adda iibinta iyo diyaarinta qalabkii diiwaangelinta
- B Lasoo wareegidda systemka aqoonsiga qaran
- C Diiwaan Galinta muwaadiniinta oo ah 38149 qof

Diyaarinta adeega verification (HUBIYE) Certificate Delivery System (CDS), Data Access Gate way (DAG), E-Aqoonsi (also known as Mobile Digal ID).

Daahfurka Aqoonsiga Qaran iyo qabashadda shirkii koowaad ee Aqoonsiga 16-17 Sept, oo kasoo qaybgaleen 650 qof oo ka kala socda Hay'addaha Dowladda, Ganacsatadda, Hay'addaha Caalamiga ah iyo Safaradaha Wadanka dagan.



Diyaarinta Xarumo ka baxsan Caasumada, gaar ahaan maamul gobleedyada kala ah Jubaland, Galmudug iyo Koonfur Galbeed, oo laga hirgaliyay midiiba hal xarun oo diiwaan galin.



Wacyigalin (Xoojinta xiriirka)

A. Abuurida xariir wadashaqeyn ee ka dhaxeeya hay'adda NIRA iyo hay'addaha kale ee dowladda, Ganacsatadda, Sida Bangiyada, Xawaladaha, Shirkadaha isgaarsiinta iyo Hay'adaha kale ee Adeega bixiya j. Dhisida xariir togan ee kadhaxeeya hay'adda NIRA iyo hay'adda caalamiga ah

Gunaanad

Hay'adda waxaa ka go'an ka miradhalinta qorshayaasha iyo yoolka u dagsan, waxayna ku kalsoontahay xaqiijinta yoolalkaas iyadoo la kaashanaysaa Hay'adaha dowladda iyo daneeyeyaasha kale. Sidoo kale Hay'addu waxay dar-dar galinaysaa diiwaan galinta muwaadiniinta iyadoo u qorshaysan tahay in la helo aqoonsi qaran oo sugan.

Mahadsanid